**DAAWADAADA: Furosemide ____mg**

**Maxaan u qaadanayaa daawadan?** Waxaad leedahay dhiig kar. Dhiig karku waa halis hadaan la daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa hadaan lagaa daawayn dhiig karka.

**Sideen u qaataa daawadan** **Qaado 1 ama 2 kiniin maalin walba.**
Hadii aad qaadanayso 1 kiniin, **Qaado 1 kiniin ah intaanad waxkale cunin aroortii.** Waxba ha cunin ka hor inta aanad qaadan kiniinka.
Hadii aad qaadanayso 2 kiniin ah, sare. **Qaado 1 kiniin ah oo waxa ugu horeeya ah aroor walba. Qaado kiniinka labaad 6 saacadood kadib.** Waxba ha cunin ka hor inta aanad qaadan kiniinka.

**Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan?**

Mararka qaar waxa jirta saamayn kaaga iman karta qaadashada daawada. Saamayntu waa wax iska caadi ah inaad dareento. Saamaynta kaaga imanaysa qaadashada daawada Furosemide markaanu jidhkaagu horay ula soo qabsan waxa kamid ah, dawakhaad, madax xanuun, jahawareer, muruqyo bur bur, iyo yalaalugo.

Saamaynta qaarkeed ma dhacdo badanka, haday dhacdana waxay noqon kartaa mid halis ah. **Wac 911 ama isla markiiba aad qolka gurmadka haddii aad isku aragto: finan; wajiga, dibnaha, carrabka, ama cunaha oo barara; Neefsashada oo kugu adkaata; maqalka oo yaraada; isbeddelka xaddiga kaadida; xanuun daran; guduudasho iyo/ama barar gacmaha ama lugaha ah**

**Maxaa kale oo aan u baahanay inaan ogaado?**

1. Waa inaad qaadataa daawadan maalin kasta xataa hadaad caadi dareento.
2. Waa inaad buuxisaa daawadan bil kasta.
3. Hadii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad oo kale ama qolka gargaarka degdega ah, fadlan u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadato daawada Lisinopril.

"Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su'aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn."